



Macallinkaaga aad jeceshahay u magacaw Macallinka Sanadka ee Gobolka iyo Oregon

Ma garanaysaa macallin farqi weyn ka dhex samaynaysa noloshada ardayda? Waxaa la aqbalayaa magacaabista loogu talagalay Abaalmarinada Macallinka Sanadka ee Gobolka iyo Oregon ee 2020-ka.

Waaxda Waxbarashada ee Oregon waxay aqbalaysaa magacaabista abaalmarinada loogu talagalay degmooyinka adeegyada waxbarashada gobolka ee dhan 19-ka, iyada oo la bilaabayo nidaam horseedaya magacaabista qofka helaya Abaalmarinta Macallinka Sanadka ee Oregon. Nidaamka, oo uu gacanta ku hayo ODE iyada oo lala kaashanayo Bakhtiyaanasiibka Oregon, wuxuu ku jiraa sanadkii labaad ee la ballaarinayo ee la gaarsiinayo ku guuleystayaasha ilaa heerka gobol.

Ku guuleystayaasha heerka gobol waxaa la magacaabi doonaa Maajo waxayna noqon doonaan dadka loo soo magacaabay maamuuska gobolka oo dhan, kaasi oo lagu dhawaaqi doono Sibtambar. Dugsiyada Dadweynaha Portland ayaa loo tixgelin doonaa maamuuska gobolka kaasi oo gaarsiisan/daboolaya Adeega Waxbarashada Degmada ee Multnomah, iyada oo ay la socdaan macallimiin ka socota degmooyinka Centennial, Corbett, David Douglas, Gresham-Barlow, Parkrose, Reynolds iyo Riverdale.

Qof kasta oo jecel in uu magacaabo macallin [waxaa lagu martiqaadayaa in uu internet-ka foom ka gudbiyo](#) muddo aan ka dambeyn Janaayo 31. Macallimiinta la magacaabay waxaa laga codsan doonaa in ay codsi ku buuxiyaan muddo aan ka dambeyn Maarso 30. Abaalmarinada degmada waxaa ka mid ah abaalmarin dhan \$500. Macallinka Sanadka ee Oregon wuxuu heli doonaa \$5,000, iyada oo dugsiya qofka guuleystaa uu sidoo kale heli doono hadiyad dhan \$5,000, iyo saddexda kale ee u soo baxay kaalinta kama dambeysta ah midkiiba la siin doono hadiyad dhan \$2,000, iyada oo \$2,000 oo kale ay aadi doonto dugsiya qof kasta oo u soo baxay kaalinta kama dambeysta ah.

Laba sano ka hor, macallinka tirsan PPS, Matthew Bacon-Brenes, ka dibna ka tirsanaa Dugsiya Dhexe ee Mt. Tabor, ayaa ku guuleystay Abaalmarinta Macallinka Sanadka ee Oregon ee 2018-kii, isaga oo noqday macallinkii afaraad ee ka tirsan PPS ee helay maamuuska tan iyo intii la bilaabay 1955-kii. Bacon-Brenes, oo tan iyo markaa u wareegay xafiiska degmada isaga oo noqday macallin wax la taliya, ayaa intaa [ku darsaday Abaalmarinta Horace Mann oo loogu talagalay Shaqo wanaaga Macallinka ee 2019-ka](#), isaga oo ka mid ahaa shan qof uu ku guuleystay qaran ahaan.

Ku guuleystayaashii hore ee PPS ee Abaalmarinta Macallinka Sanadka ee Oregon waxay ahaayeen Elena Garcia-Velasco oo ka socota SEIS oo ka jira Roosevelt oo ku guuleysatay 2012; Carlton Bryson oo ka tirsanayd Dugsiya Sare ee Benson oo ku guuleysatay 1970; iyo Lorraine Sabo oo ka tirsanayd Dugsiya Hoose ee Lewis oo ku guuleysatay 1962.

